# Xarunta Joojinta (StoppCenter)

## –xiriir ammaan ah oo ka madax bannaan rabshad

Polisen

• HOY LA WADAAGO

**Xarunta Joojinta (StoppCenter)**
Drottninggatan 16 A, Eskilstuna
Tel. 016-710 81 20
E-post: socialforvaltningen@eskilstuna.se

### Waxaanu rabnaa in adiga iyo qoyskaaguba aad caafimaad qabtaan!

Keligaa ma tihid. Dad badan ayaa ku nool xiriiro ay rabshado ka dhacaan. Rabshaduhu waxay saameeyaan qoyska oo dhan, carruurta, iyo asxaabta ku xeeran. Dhaqan dembiyeedyada iyo rabshadaha ku jira xiriirka waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan: hanjabaada, garaacida, laadka, riixidda, xakameynta, kufsiga, tacadiyada galmada, aflagaadada/ku xadgudub, daba-galka (jir ahaan iyo/ama dhijitaal ahaan) ama waxyeellaynta hantida qofka aad lammaanaha tihiin..

### Xarunta Joojinta (StoppCenter) – waxay ka hortagtaa rabshadaha ka dhanka ah xiriirka dhow waana iskaashi u dhexeeya booliska, adeegyada bulshada ee degmooyinka Eskilstuna iyo Strängnäs, Gobolka Södermanland iyo hay'adda daryeelka dembiilayaasha (Kriminalvården).

Waxaanu si wadajir ah uga shaqeynaa sidii loo joojin lahaa rabshadaha ka dhaca xiriirka dhow.

• Annagu uma dulqaadanno rabshadaha.
• Ma doonayno in dadka kuu dhow la waxyeelleeyo.
• Ma doonayno inay carruurtu ku koraan rabshado ka jira qoyska dhexdiisa.
• Waxaa jira caawimo la heli karo.

Waxaanu halkan u joognaa idinka oo waxaanu idiin soo bandhigaynaa caawimaadda aad u baahan tihiin si aad ugu noolaataan si ammaan ah xiriirkiinna lammaanaha iyo qoys ka madax bannaan rabshado. Waxaanu bixinnaa taageero wadadalo ah, caawimo la xiriirta isticmaalka maandooriyaha/mukhaadaraadka iyo taageero ku saabsan arrimaha guriyeynta iyo dhaqaalaha. Waxaanu bixinaa magangelyo/ilaalin xaaladaha degdega ah.

Waxaanu xiriir la leenahay ururro ku yaalla Eskilstuna iyo Strängnäs oo iyaguna bixiya caawimaad.

### Na soo waca – waxaanu u joognaa idinka!

| | |
|---|---|
| Rabshadaha hadda socota ee degdeg ah | Wac SOS Alarm 112 |
| Talo bixin ama soo sheegid dembi | Booliska114 14 |
| Talo, taageero iyo/ama baahi loo qabo ilaalin | Xarunta Joojinta (StoppCenter) 016-710 81 20 (maalmaha shaqooyinka)<br>Degmada Strängnäs 0152-291 00 |
| Baahi degdeg ah oo ku saabsan ilaalin iyo/ama talo iyo taageero | Heeganka adeegga bulshada (Socialjouren) 016-710 36 00 (Habeenkii & maalmaha fasaxa) |
| Khadadka taageerada qaran ee qofka la kulma rabshado | Khadka taageerada haweenka ee 116 016<br>Khadka taageerada ragga 020-80 80 80<br>Khadka taageerada ee dadka jinsigooda beddela 020-55 00 00 |
| Ururada ku yaala Eskilstuna iyo Strängnäs ee bixiya talooyinka iyo taageerada qofka la kulmay rabshadaha | Heeganka haweenka Moa (Kvinnojouren) 016-51 21 09 (Eskilstuna)<br>Heeganka haweenka iyo gabdhaha Måna 070-041 43 93 (Strängnäs) |
| Khadka taageerada ee loogu talagalay qofka rabshadaha geysta | **020-55 56 66** |

Eskilstuna kommun · STRÄNGNÄS KOMMUN · ÅKLAGARMYNDIGHETEN · REGION SÖRMLAND · KRIMINALVÅRDEN